

Tallaallo kale ayaa la oggolaaday in ay ka mid noqdaan shahaadada koroonaha

Dadka ku tallaalan tallaallada ay oggolaadeen Ingiriiska, Maraykanka iyo Hay'adda Caafimaadka Adduunku (WHO) waxa karantiilka soo gelidda waddanka looga debcinayaa si la mid ah dadka ku tallaalan tallaallada ay EMA oggolaatay.

Laga soo bilaabo 24-kii Juun waxa ay Norway ku xidhnaynd nidaamka Midowga Yurub ee lagu xaqiijiyo shahaadooyinka koroonaha ee waddamada kale. Taas oo macnaheedu yahay in dadka qaatay tallaallada laga isticmaalo Midowga Yurub/Aagga Dhaqaale ee Yurub (EU/EØS), laga debciyay karantiilka soo gelidda waddanka. Si la mid ah kuwa EU/EØS, waxa ay Norway oggolaatay shahaadooyinka koroonaha ee [Ingiriiska](#), [Wales](#) iyo [Woqooyiga Ayrland](#).

Waxannu gacanta ku haynaa diyaarinta nidaamyo kale, si arrintan loo ballaadhin karo oo looga dhigi karo mid khuseysa dadka ku tallaalan tallaallada ay oggolaadeen Ingiriiska, Maraykanka iyo WHO. Ilaa hadda waxa mid ah dadka lagu tallaalay Covishield (tallaalka AstraZeneca ee lagu sameeyay Hindiya), Sinophram iyo Sinovac. Waxa shardi ah in shahaadada koroonuhu tahay mid la hubin karo iyadoo la isticmaalayo QR waafaqsan nidaamka EU ee shahaadooyinka koroonaha. Wakhti ayay qaadan doontaa in la diyaariyo nidaamka loogu talagalay dadkan.

– Waan ku faraxsan ahay in dad kale hadda loo aqoonsanayo dad si buuxda u tallaalan. Waxa kale oo aannu gacanta ku haynaa diyaarinta xal suurtagelinaya in dadka Norway ee tallaalka Covishield ka soo qaatay dibedaha tallaalka looga diiwaangeliyo SYSVAK. Mar kale ayaannu sheegi doonnaa xilliga arrintani diyaar noqon karto, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Afar waddan oo kale ayaa la oggolaanayaa shahaadadooda koroonaha

Woqooyiga Makedooniya, Turkiga iyo Yukrayn ayaa hadda ku xidhmay nidaamka EU ee shahaadooyinka koroonaha. Waxa kale oo Norway laga bilaabo berito saacadda 17.00, 3-da

Sebtember, ay oggolaanaysaa shahaadooyinka Iskotland ee lagu xaqiijin karo QR. Taas oo macnaheedu yahay in dadka si buuxda ugu tallaalan tallaallada ay oggolaadeen hay'adda dawooyinka ee Yurub ee EMA, Ingiriiska, Maraykanka iyo WHO ay si xor ah u soo geli karaan Norway. Waxa la mid ah dadka cudurka koroonuhu ku dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay. Waxa dadkan laga dhaafayaa karantiilka soo gelidda, umana baahna in ay wataan caddaynta tijaabo cudurka laga waayey, in ay buuxiyaan foomka diiwaangelinta soo gelidda ama in ay tijaabo iskaga qaadaan xuduudda.

Debcinno loo samaynayo dadka ka qaybgalaya daraasado ku saabsan tallaallada

Si aanay wax dhib ah u noqonin in laga qaybgalo daraasadaha ku saabsan tijaabinta tallaallada cusub, waxa la oggolaanayaa in dadka ka qaybgala karantiilka soo gelidda looga debciyo si la mid ah dadka ku tallaalan tallaallada ay EMA oggolaatay. Arrintani waxay khuseynaysaa tijaabinnada tallaallada ee oggolaansho ka haysta EU/EØS, Maraykanka iyo Ingiriiska. Waxa shardi ah in tallaallada laga soo qaatay daraasadaha noocaas ahi ay ka muuqdaan shahaadada koroonaha iyo nidaamka EU.

Arrintani waxay khuseyn doontaa dad aad u tiro yar, oo qaarna la siiyay tallaal run ah, halka kuwo kalena la siiyay placebo (tallaal been ah). Machadka Caafimaadka Dadweynaha ayaa gartay in ay aad u yar tahay khatarka faafidda cudurka ee ka imanaysa in dadkaas laga dhaafo karantiilka soo gelidda. Wakhti ayay qaadan doontaa in la diyaariyo nidaamka loogu talagalay dadkan.